STOCKHOLMS STADSMISSION



# MACLUMAADKA KHUSEEYA MAARAYNTA MACLUMAADKAAGA SHAQSIYEED

## Wakiil ka socda Magaalada Howgalka Stockholm

**Nooca la soo koobay**
Hadii ay ku matasho Magaalada Hawgalka Stockholm, anagoo ah (Magaalada Hawgalka Stockholm) waxaanu der-dergelinaa macluumaadkaaga shaqsiyeed.

- Dhammaan macluumaadka shakhsiyeed waxa lagu kaydiyaa hab kayd ah oo IT-ga ah waxana marin u heli karaan oo keliya shaqaalaha Xafiiska Magaalada Hawlgalka Stockholm.

- Macluumaadkaaga khaaska ah waxa kaliya oo loo isticmaalaa qaab dhismeedka matalaada. Xogta gaarka ah qaarkood (aan xasaasi ahayn) waxaa laga yaabaa in lala wadaago qolo saddexaad si loo sal garo yoolalka aanu wada dajinay.

- Xogtaada khaaska ah waa la masaxaa hal (1) sano ka dib marka matalaadu dhamaado ama la masaxo isla markaaba haddii aanay matalidu bilaaban. Xaaladaha gaarka ah, inta badan haddii aan kugu taageerno talo sharciyeed, waxaanu keedin karnaa xogtaada muddo ka badan hal sano ka dib xiriirkaagii ugu dambeeyay ee aad la yeelatay Magaalada Howlgalka Stockholm. Tani waxay dhacdaa kaliya haddii ay lagama maarmaan tahay in lagu taageero, tusaale ahaan racfaanka.

- Haddii lagu geliyo liiska sugitaanka, macluumaadkaaga shakhsiyeed ayaa la masixi doonaa hal (1) sano ka dib xiriirkaagii ugu dambeeyay ee aad la yeelatay Howlgalka Magaalada Stockholm.

Hoos ka eeg wixii macluumaad dheeri ah.

# WARBIXINTA MAAREYNTA MACLUUMAADKAAGA SHAKHSIGA AH

## 1. Hor dhac

Ujeedada warbixintan waa in la gudbiyo macluumaad ku saabsan sida Stockholms Stadsmission (urur. lr 802003-1954) (”**Stadsmissionen**” ama ”**anagu**”) u maareyno macluumaadkaaga shakhsiga xilliga ka qaybqaadashadaada Stadsmission ee dhinaca talo- iyo taageero (”**Matalaad**”).

Waxaanu ixtiraamaynaa sharaftaada oo dhowraynaa macluumaadka shakhsiga ee aanu hayno ee kugu saabsan adiga. Dhammaan maareynta macluumaadka shakhsiga waxay u dhacaysaa si waafaqsan Midowga Yurub Sharcigeeda Guud ee Ilaalinta Macluumaadka (Ingiriisi. *General Data Protection Regulation*) (”**GDPR**”). Hoos waxaa ku sharraxan qaababka aanu u ururino, u maareyno una qaybino macluumaadkaaga shakhsiga ah.

## 2. Maareynta macluumaadka shakhsi ee kugu saabsan adiga oo ka qaybqaate ahaan ah

### 2.1 Waa kuwee macluumaadka shakshiga ee la maareeyo?

Si aanu fursad ugu helno inaanu ka shaqayno codsigaaga oo aanu xaaladaha la isticmaalayo u fulino ka qaybqaadashadaada La talinta waxaanu u baahanahay inaanu maareyno macluumaadkaaga shakhsiga. Waxaanu maareynaa macluumaadka shakhsiga ee adigu ka qaybqaate ahaan na siiso kuwaas oo muhiimad ahaan ka kooban magac, lambarka shakhsiga, macluumaadka xiriirka iyo macluumaadka kale ee ku khuseeya dhinaca La talinta.

Xaalado dhif ah ayaanu iyadoo la adeegsanayo oggolaansho adiga lagaa helay aanu ku soo qaadan karnaa macluumaad shakhsi oo kugu saabsan oo laga helo qayb saddexaad, tusaale ahaan hey’ado dawladeed.

### 2.2 Waa kuwee ujeedooyinka loo maareeyo macluumaadka shakhsiga ah?

Waxaanu u baahanahay inaanu maareyno macluumaadkaaga shakhsiga ah si aanu fursad ugu helno inaanu kugu aqoonsano adiga, kuula soo xiriirno adiga, u fulino arrintaada dhinaca La talinta oo uga shaqayno maamulkayaga la xiriira La talinta. Macluumaadkaaga shakhsiga ma loo maareynayo ujeedooyin kale oo aan ahayn in la bixiyo taageero lagu siiyo dhinaca La talinta.

### 2.3 Waa kuwee sababaha sharciyan ee dhinaca maareynta macluumaadka shakhsiga ah?

Maareyntayada macluumaadka shakhsiga waxay u dhacdaa si taageero ka haysata dantayada ah in laga shaqeeyo codsigaaga, lana bixiyo taageero dhinaca La talinta, la maamulo nidaamka La talinta oo loo dhiso xiriirka aanu kula leenahay ee dhinaca La talinta. Waxaanu qiimeynay in dantayada ah in la macluumaadkan shakhsiga ah loo daryeelo ujeedooyinkan ay ka miisaan weyntahay wixii dano ah ee ka soo horjeedi kara.

Xaalado dhif iyo naadir ah ayaanu si xadaysan u maareyn karnaa waxa lagu magacaabo

macluumaadka shakhsiga ee xaasaasiga ah ee aad nagu siisay dhinaca La talinta. Waxaanu macluumaadka shakhsiga ah uga shaqaynaa ilaa heerka ah lagama maarmaan si loo fuliyo arrinta gaarka kuu ah ee dhinaca La talinta. Xaalado jira awgeed waxaa la fuliyaa xadayntayada maareynta macluumaadka shakhsiga ee xaasaasiga ah marka laga reebo dhinaca ururada samafalka ah sida ku jirta qodobka 9.2(d) i GDPR. Waxa keliya ee aanu macluumaad shakhsi u dhiibaynaa qayb saddexaad (tusaale ahaan hey'ado dawladeed) iyadoo la haysto oggolaanshahaaga.

**2.4 Intee in leeg ayaa la keydiyaa macluumaadka shakhsiga ah?**

Waxaanu keydinaynaa macluumaadkaaga shakhsiga ilaa iyo inta loo baahanyahay iyadoo la tixgelinayo ujeedada dhinaca La talinta, haddii macluumaadkan aan la oggolayn ama aanay khasab ahayn in la sii keydiyo si waafaqsan sharciga jira. Caadi ahaan waxaanu macluumaadkaaga shakhsiga masaxnaa ugu dambeyn hal sano ka dib ka dib xiriirkaaga ugu dambeeya ee aad la yeelato Stadsmissionen. Dhinaca arrimaha khuseeya talo bixin sharciyan ah waxaa xaalado dhif ah jiri karta baahi ah in la keydiyo macluumaadka shakhsiga wakhti ka dheer hal sano ka dib xiriirkaagi ugu dambeeyay, tusaale ahaan si laguu siiyo taageero haddii uu jiro wax ah rafcaan.

Haddii codsigaagu aanu keenayn ka qaybqaadashada La talinta waxaanu tir-tiraynaa macluumaadkaaga isla markiiba, marka laga reebo haddii lagu gelinayo liistada sugitaanka. Xitaa haddii aad ku sii jirto ku meelaynta liistada sugitaanka waanu tir-tiraynaa macluumaadkaaga shakhsiga ugu dambeyn hal sano ka dib markaad xiriir la yeelatay Stadsmissionen.

**2.5 Yaa heli kara macluumaadkaaga shakhsiga?**

Waxaanu qaadanay talaabooyin farsamo oo haboon iyo talaabooyin amaan oo habaysan si macluumaadkaaga shakhsiga looga ilaaliyo khasaaro iyo in dad aan loo ogolayn ay helaan. Keliya waa shaqaalaha Stadsmission kuwa ku xiriirsan La talinta ee u baahan inay maareeyaan macluumaadkaaga shakhsiga si waafaqsan ujeedooyinka lagu soo sheegay kor kuwa helaya macluumaadkaaga shakhsiga.

Waxaa dhici karta inaanu macluumaadkaaga shakhsiga la qaybsano kuwa ku xiriirsan La talinta ee qaybaha kale ee ururka Stadsmissionen iyo adeeg bixiyayaasha fuliya adeegyada dhinacayaga ama qaab kale noola leh wada shaqayn, sida adeeg bixiyaha dhinaca adeegyada kombiyuutarka ama adeegyada maamulka.

Xaalado dhif ah ayay dhici kartaa inaanu xitaa macluumaadkaaga shakhsiga la qaybsano qayb saddexaad, tusaale ahaan hey'ado dawladeed iyo daryeel caafimaad bixiyayaal, laakiin waa oo keliya ilaa xadka loo baahanyahay si loo fuliyo arrintaada dhinaca La talinta. U gudbinta gudoomayaasha waxay ku salaysantahay in maareyntan ay lagama maarmaan u tahay ujeedada khuseysa danahayaga aanu xaqa u leenahay (miisaamida danta).

Macluumaadkaaga shakhsiga ma u gudbinayno dalal saddexaad, micnihii dalal ka baxsan aaga Midowga Yurub/Iskaashiga Yurub.

## 3. Waa kuwee xuquuqdaadu?

Stockholms Stadsmission (urur. lr 802003-1954) lehna cinwaanka Box 35, 131 06 Nacka, lehna e-mailadress info@stadsmissionen.se iyo telafoon lambarka 08-684 230 00, ayaa mas'uul ka ah in macluumaadkaaga shakhsiga loo maareeyo si sax ah oo waafaqsan sharciga jira. Dheeraad ku saabsan xuquuqdaada ka akhri hoos.

- **Xaqa in la helo**: Adigu waxaad xaq u leedaha inaad ogaato kuwa ay yihiin macluumaadka shakhsiga aanu maareyno ee kugu saabsan adiga, ujeedooyinka loo maareynayo macluumaadkan shakhsiga iyo cidda aanu la qaybsanayno macluumaadkan shakhsiga ah. Adigu waxaad xitaa xaq u leedahay inaad hesho macluumaadkan shakhsiga oo aad codsato koobiga macluumaadka shakhsiga ee la maareynayo.

- **Xaqa loo leeyahay in la saxo**: Haddii aad aragto in aanu haysano macluumaadkaaga shakhsi oo qalad ah ama aan dhamaystirnayn, waxaad mar walba codsan kartaa inaanu saxno ama dhammaystirno macluumaadkaag shakhsiga ah.

- **Xaqa loo leeyahay tir-tirid iyo xadayn:** Xaaladaha qaarkood, waxaad codsan kartaa inanau tir-tirno macluumaadkaaga shakhsiga ama aanu xadayno maareyntayada inta lagu jiro wakhti cayiman (tusaale ahaan haddii macluumaadkaaga shakhsiga aanay lagama maarmaan u sii ahayn ujeedada). Fadlan fiiro u yeelo in tir-tirida ama xadaynta macluumaadkaaga shakhsiga ah ay natiijadeedu noqon karto in aanad ka sii qaybqaadan karin La talintan.

- **Xaqa in la diido**: Waxaad xaq u leedahay inaad diido maareynta aanu fulinay kuna salaysan danta aanu xaqa u leenahay.

- **Xaqa loo leeyahay macluumaad habaysan**: Markay noqoto xaaladaha aanu maareyntan ku salaynay ogolaanshahaaga waxaad xitaa xaq u leedahay in aad hesho in macluumaadkaaga shakhsiga oo qaab ahaan habaysan, guud ahaan makiinad akhrin karto oo aad hesho in kuwaas loo gudbiyo mas'uul kale oo ah dhinaca macluumaadka shakhsiga.

- **Dib ula soo noqoshada ogolaanshaha**: Haddii aad bixisay ogolaanshahaaga maareynta macluumaadkaaga shakhsiga waxaad mar walba xaq u leedahay inaad dib ula noqoto ogolaanshahaaga adigoo u maraya inaad nagala soo xiriirto dhinaca macluumaadka xiriirka ee kor ku qoran. Dib ula noqoshada ogolaanshahaaga raad ma ku yeelanayso maareynta u dhacaysa iyadoo wadata aasaaska xaq kale.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan sida aanu u maareyno macluumaadkaaga shakhsiga ah, waxaad ku soo dhawaataa inaad nagala soo xiriirto dhinaca macluumaadka xiriirka ee kor ku qoran. Haddii aad wax diidantahay ama hayso cabasho khuseysa sida aanu u maareyno macluumaadkaaga shakhsiga waxaad xaq u leedahay inaad nala soo xiriirto ama aad cabashadaada u gudbiso Hey'ada dawlada ee dhowrida shakhsiga.

## 4. Isbadalo

Haddii la fuliyo wax ah isbadalo khuseeya maareynta macluumaadkaaga shakhsiga markaas waanu kugu wargelinaynaa taas iyadoo loo marayo in la bixiyo nuqul cusub iyadoo la joogo dhismayaasha Stadsmissionen.